# Qandaraaska Bedbaadada Sayniska ee Ardeyga Dugsiga Dhexe

**Magaca Ardeyga**____________________________ **Dugsiga** __________________________________________

**Macalinka** ______________________________________**Koorsada Sayniska** _____________**Muddada** __________

**Ujeeddada**

Sayniska waa fasalka shaybaar leh ka-qaybgal firfircoon. Waxaa laga yaabaa in aad sameynayso hawlo shaybaar badan oo ka mid ah qalab, kiimiko iyo/ama xayawaan halis noqon kara haddii aan si habboon loo maamulin. Bedbaadada ee fasalka sayninka waa mudnaanta koowaad ee ardeyda, macalamiinta, iyo waalidiinta. Xeerarkan iyo xeerar kastoo dheeraad ah ee uu bixiyay macalinkaaga waa in ay raacaan dhammaan ardeyda dhigata sayniska waqti kasta. Nuqulka qandaraaskan waa in ay saxiixaan adiga, waalidkaaga/mas'uulkaaga waa in lagu xafido gudaha buugga aad sayniska ku qoroto.

**Xeerarka Bedbaadada**

1. Si mas'uuliyad ay ku dheehan tahay ugu dhaqan dabeecadaada fasalka ee ugu wanaagsan. Ku cayaaridda ama ka qaybgalka kaftan ama kaftan faro ka cayaar ah waxaa ay halis gelin karaan adiga ama ardeyda aad isku fasalka tihiin.

2. U diyaargarowga shaqada shaybaarka waxaa ka mid ah xirashada dharka bedqabka. Ha xiran dhar kaa waaweyn ama cirif-dheer leh oo wax daadin kara ama ku kufin kara. Gadaal u xiro timaha dhaadheer. Keliya xiro kabo xiran oo buud ah, ha xiran kabo dacas ah, saandal ama kabo cirib dheer leh. Isticmaal dhufan-dhowr haddii macalinkaaga uu sidaa ku faro.

3. Dhammaan agabka shaqsi sida boorsooyinka, jaakadaha, buugaagta, caagagga biyaha, iwm. waxaa loo baahan yahay in la iska dheereeyo ka hor inta aan la bilaabin waxqabadka shaybaarka. Keliya agabka shaybaarka, tilmaamaha, waraaqaha lagu shaqeeyo iyo qalimaan waa in ay saarnaadaan miiska shaybaarka.

4. Si taxaddar leh u dhageyso tilmaamaha macalinkaaga sidaa darteed waxaa raaci kartaa timaamahaas iyo habraacyada qoran. Haddii aadan fahmin tilmaan ama qayb habraac ah, caawimaad weyddiiso. Marnaba wax haku sameyn shaybaarka ee aannu sheegin habraacyada shaybaarka ama macalinkaaga.

5. Ha taaban wax qalab ah ama agab shaybaar ilaa lagu faro in aad sidaas sameyso mooyaane. Agabka u isticmaal keliya sida lagu farey.

6. Samee keliya tijaabooyinka la ansaxiyey haddii macalinkaaga uu oggolaansho kuu siiyo in aad wax si kale u sameyso mooyaane.

7. Ha ku cunin wax cunto ah, ha ku cabbin cabbittaannada, ama ha ku ruugin xanjo shaybaarka gudahiisa. Ha dhadhaminin agabka shaybaarka. Ha u isticmaalin qalabka dhalooyinka ee shaybaarka sida weelasha cuntada ama cabbitaannada lagu shubto. Waxyaabaha cuntada ah waa in aan la keenin shaybaarka.

8. Ha taaban wejigaaga, indhahaaga, ama afkaaga inta aad isticmaaleyso agabka sayniska ah.

9. Isticmaal ookiyaalaha bedbaadada marka laguu sheego in aad u baahan tahay. Xirnaw bilow ilaa dhammaadka tijaabada, haddii macalinkaaga kuu sheego in aad iska bixiso mooyaane.

10. Raac tilmaamaha macalinkaaga ee nadiifinta. Nadiifinta agabka shaybaarka iyo meelaha lagu shaqeeyo waxaa ay qayb ka yihiin dhammeynta hawsha shaybaarka. Marka aad soo celiso qalab la nadiifiyay, ogeysii macalinkaaga haddii uu dillaacay ama uusan si habboon u shaqeynayn.

11. Hubso in aad taqaanno halka agabka qashinka lagu rido. Hubso in aad halkaas ku rido.

12. Gacamahaaga ku dhaq saabuun iyo biyo ka dib marka aad sameyso tijaabooyinka oo dhan.

13. Isla-markiiba ogeysii macalinkaaga haddii wax shil, dhaawac ama xaalad khatar ah ay dhacaan waxaadna tilmaamo ka sugtaa macalinka ka hor inta aadan wax kale ku saleyn. Kuwan waxaa ka mid ah quraaradaha jabey iyo waxyaabaha daatey.

14. U hayso in kiimikooyinka lagu isticmaaley shaybaaradaada in ay halis noqon karaan haddii aan sida ku habboon loo adeegsan. Macalinkaaga wuxuu ku siin doonaa tilmaamo ku saabsan habka habboon ee taabashada ama urinta kiimiko kasta haddii loogu baahan yahay shaybaarka. Haddii kale, ka fogaaw taabashada ama urinta kiimikooyinka.

15. Haddii shaybaarkaaga uu ku lug leeyahay xayawaan nool (oo ay ka mid yihiin cayayaanka), hubso in aad fahamsan tahay oo aad raacdo tilmaamaha macalinkaaga ee loogu talogalay sida loo maamulo. Xiro gacmo-gashi oo xayawaannada u qabo si taxaddar leh. Isla-markiiba ogeysii macalinkaaga haddii uu xayawaanku ku qaniino, xagto ama dabeecadaha kale ee weerarka ah.

16. U isticmaal labada gacamood in aad ku qaado mikroskoobka--hal gacan ku qabo gacankiisa, midda kalena ku qabo salkiisa.

17. Raac tilmaamaha baraha markaad ka shaqeynayso kaambiyoonayaasha la kaydiyey iyo agabka dillaacinta. Isticmaal daryeel dheeraad ah marka aad adeegsanayso qalab af leh, sida mindida iyo manqaska. Markaad wax jareyso ka dheeray jirkaaga.

18. Ka fogaaw meelaha kaydka haddii macalinkaaga uu fasax kuu siiyo in aad gasho mooyaane.

19. Si taxaddar leh u qabo dhammaan agabka quraaradda ah. U isticmaal maro ama suuf kulul in aad ku qaado waxyaabaha quraaradda ah ee kulul. Haddii ay dhalo jabto, ogeysii macalinkaaga tilmaamaha ka hor inta aadan nadiifin.

20. U isticmaal ilaha kuleelka keliya sida la farey. Haka tagin saxanka kulul ama shawlad dabeedka iyagoon lala joogin.

21. Ogow halka qalabka bedbaadada (dab damiyaha, bustaha dabka, meelaha indhaha lagu dhaqdo, qubeyska bedbaadada, xirmada qalabka gargaarka koowaad) ay yaallaan iyo sida loo adeegsado. Ogow halka laga baxo marka ay xaalad degdeg ah dhacdo iyo waxa la sameeyo markii ay dhacdo xaalad degdeg ah ama tijaabo ahaan loo sameeyo.

**Su'aalaha Bebaadada Shaqsi**

22. Miyaad xiritaa xuub-arageed?

☐ Haa ☐ Maya

23. Miyaadan arkin midabyada qaar?

☐ Haa ☐ Maya

24. Ma leedahay wax xasaasiyad ah?

☐Haa ☐Maya Haddii ay fadlan tax liiska: ___________

**Heshiiska Ardeyga iyo Waalidka/Mas'uulka**

Aniga oo ah,_______________________________ (magaca ardeyga), waxaan akhriyey oo aan oggolahay in aan raaco dhammaan xeerarka bedbaadada ee ku qoran Qandaraaskan Bedbaadada Sayniska. Waxaan ogolahay in aan raaco xeerarkan si aan u hubiyo bedbaadadeyda, iyo bedbaadada ardeyda kale iyo barayaasha Waxaan ilaa xadka ugu macquulsan la shaqeyn doonaa baraheyga iyo ardeyda kale si aan u ilaaliyo bedbaadada bay'ada shaybaarka. Waxaan si dhow u raaci doonaa dhammaan tilmaamaha qoran iyo kuwan afka ah ee uu baraheyga bixiyay. Waxaan ogsoonahay in ku xadgudub kasta ee qandaraaskan bedbaadada ee ka dhasha hab-dhaqanka aan bedqabka laheyn ee shaybaarka ama dhaqan-xumada ee qaybteyda waxaa ay keeni kartaa in shaybaarka la iga saaro.

_________________________ _________________________ _________________

Magaca Ardeyga (daabacan) Saxiixa Ardeyga Taariikh

Waxaan akhriyey qandaraaskan waxaanna ka warqabaa tallaabooyinka la qaadey si loo hubiyo bedbaadada ilmaheyga ee shaybaarka sayniska.

_________________________ _________________________ _________________

Magaca Waalidka/Mas’uulka (daabacan) Saxiixa Waalidka/Mas’uulka Taariikh